

# **Siyaasadda JLCC- Cuddurada La Isku Gudbin Kara / Faafa**

Degmada dugsigga waxay u baahan tahay in uu bixiyo adeegyo waxbarasho ah oo uu siinayo dhammaan carruurta da'da-dugsigga gaartay kuwaasi oo degan gudaha xudduudiisa. Si kastaba, qaanuun ahaan, oggolaanshaha dugsiyadu waxaa dhici karta in loo diido canug kasta oo la aqoonsaday in uu cudur qabo halkaasoo ka qaybgalkiisu ay dhib u keeni karto caafimaadka ardayda kale.

Guddiga waxbarashadu wuxuu aqoonsanayaa in cudurada faafa kuwaasi oo kudhaca ardayda ay u kala qaybsamaan cuduro caadi ah oo carruurta ku dhaca, xanuun badan mudadiisuna-gaabantahay ee dabiiciga ah, xanuun dabadheer, cuduro nolosha-halis gelinaya sida cudurka aydhiska ee sababa jeermiska baabi'iyaya difaaca jirka banii'aadamka (HIV). Degmada Dugsigga waxay isku halaynaysaa kuna kalsoon tahay talada daawaynta bulshada ee qiimaynta gudbinta jeermisyada cudurada faafa si ay u xadido qaabka ugu fiican ee loo ilaalin lahaa caafimaadka dhammaan ardayda iyo shaqaalaha.

Maareynta cudurada caadiga ah ee faafa waa in ay noqotaa mid laga tixraacayo heerka degsan ee Qaybta Caafimaadka Colorado. Ardayga laga helo calaamadaha cudurada-la isku gudbiyo ee faafa waxaa si ku meel gaar ah looga reebayaa imaatinka dugsigga.

Ardayda dhigata dugsigga ee ka cabanaysa jiro waxaa loo wareejinayaa kalkaalisada dugsigga waxaana dhici karta in maamulaha uu guriga u diro sida ugu dhakhsiga badan ee uu waalidka ama qofku saxiixo foomka oggolaanshaha ardayga caafimaadka degdega ah ee la wargeliyay.

Degmadu waxay u celinaysaa xaqa uu ardaygu u leeyahay dalbashada qoraal caafimaad ah oo u oggolaanaya in uu dib dugsigga ugu soo laabto.

Dhammaan hawlaha la xariira siyaasaddan, degmadu waxay ixtiraami doontaa xaqa uu ardaygu u leeyahay qarsoodinimo.

Marka xubin shaqaalaha ka mid ahi ama qof iskiisa waxa u qabsada helo macluumaad ku saabsan in ardaygu uu qabo cudur halis ah oo sifudud-kugudba, xubinka shaqaalaha ama qofka iskiisa wax u qabsada wuxuu isla markiiba wargelinayaa kalkaaliyada dugsigga ama muumulaha si ay u xaddidaan hawlaha ku habboon ee lagu ilaalin lahaa ardayga iyo shaqaalaha caafimaadkooda iyo ammaankooda. Maamulaha ayaa go'aansan doona nooca xubnaha shaqaalaha dheeriga ah, haddiiba wax uun, loo baahan yahay in la oggaado oo ku saabsan saameynta xaalada ardayga. Kaliya dadka sida tooska ah mas'uulka uga ah daryeelka ardayga ayaa lala socodsiin doonaa nooca qeexan ee asaga/ayada xaaladeedu ay tahay haddii la go'aansado in ay jirto baahi dadkaasi ay u baahan yihiin in ay oggaadaan macluumaadkan.

Waalidiinta carruurta kale ee imaanaysa dugsigga waxaa lagu wargelin doonaa in ilmahooda laga helay cudur faafa ayada oo aan si gooni ah loo sheegayn ardayga qabba cudurka.

Waalidiinta carruurta kale ee imaanaysa dugsigga waxaa lagu wargelin doonaa in ilmahooda laga helay cudur faafa ayada oo aan si gooni ah loo sheegayn ardayga qabba cudurka.

Maamulaha ayaa bilaabi doona nidaam hawleedyada si loo hubsado in dhammaan macluumaadka caafimaadka lagu hayo qarsoodi adag. Xubin kasta oo shaqaalaha dugsigga kamid ah kaas oo ku xadgudba sirtaasi waxaa lagu xukumi doonaa qaab edbin oo qofkaasi ku habboon.

TIX RAACA SHARCIGGA: C.R.S. 22-33-104(2)(a)  
C.R.S. 22-33-106(2)

La ansixiyay:31 Maajo , 1994